# Barnaamijyada iyo Hawlaha ICRC ee Soomaaliya

Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas (ICRC) waa urur aan eexan, dhexdhexaad ah oo madax bannaan iyadoo la aasaasay sanadkii 1863-dii ayaa hawshiisa bani'aadamnimo kaliya ah ay tahay in uu dhowro nolosha iyo sharafta dhibbaneyaasha colaadda hubaysan, xaaladaha kale ee qalalaase iyo, sidoo kale in uu siiyo gargaar. ICRC waxay kaloo ku dadaashaa in ay ka hortagto dhibaatada iyadoo horumarineysa xoojeneysana xeerka bani'aadamnimada iyo mabaadi'da caalamiga ah ee bani'aadamnimada.

Iyadoo howshhii ugu horreysay ee ICRC-da Soomaaliya ay soo bilaabatay sannadkii 1942-dii, waxay si joogto ah dalka u joogtay tan iyo sanadkii1977-dii, heshiis ay dowladda kula jirto. ICRC waxay ka hawlgashaa Soomaaliya iyadoo adeegsanaysa shabakad ka kooban 12 xafiis oo ku kala yaala Muqdisho, Hargeysa, Boosaaso, Garoowe, Gaalkacyo, Dhuusamareeb, Beledweyne, Jowhar, Xudur, Baydhabo, Kismaayo iyo Dhoobley iyo xafiis taageero ah oo ku yaala Nairobi. Waxay hawlo firfircoon ka wadaa meelaha ay sida aadka ah u saameeyeen colaadaha hubaysan iyo qalalaasaha, goobaha ay ka hawlgashana waxay si dhow ula shaqeysaa dadweynaha. Kooxda ICRC-da Soomaaliya waxay ka kooban tahay 334 shaqaale oo ay ku jiraan 45 shaqaale caalami ah.

ICRC-du waxay si dhow ula shaqeysaa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) iyo qaybaha kale ee Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas oo ka shaqeeya Soomaaliya. Waxay la hadashaa dhammaan dhinacyada colaadaha ku lugta leh waxayna si dhow oo hufan ula shaqaysaa dhammaan maamullada heer degmo, gobol, heer Dowlad-goboleed iyo heerarka federaalka. Iyadoo ka madax banaan nidaamka Qaramada Midoobay, ICRC-du waxay howlaheeda si dhow iskula dubaridaa ururrada kale ee bani'aadamnimada ka shaqeeya.

### Daryeelka Dhaawaca

- ICRC-du waxay si joogto ah u taageertaa Isbitaalka Keysaney oo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed ee Muqdisho uu maamulo (iyada oo ay wehliso Laanqeyrta Cas ee Norway ilaa sandkii 1992), Isbitaalka Madiina ee Muqdisho (tan iyo sanadkii 2000), iyo Isbitaalka Guud ee Kismaayo (tan iyo sanadkii 2013-dii)) iyada oo u mareysa bixinta dawooyinka, agabka joogtada loo adeegsado, mushaaraadka, qalabka, awood-dhiska iyo tababarka. Sanadkii 2025-ta, taageeradan waxay sahashay daweynta 19'675 bukaan, oo ay ku jiraan 1'674 oo qaba dhaawacyada hubka kuwaas oo ay ICRC-du daaweyntooda si buuxda u taageertay. Shaqo dayactir ah ayaa sidoo kale laga fuliyay 3 isbitaal.
- Haddii ay yimaadaan dhaawacyo tiro badan, ICRC-du sidoo kale waxay taageertaa xarumaha kale ee caafimaadka iyada oo u mareysa tabarucaad gaar ah (47 tabarucaad ah 24 isbitaal sanadka 2025).
- ICRC waxay taageertaa 3-da xarumood ee Aambalaasta SRCS ee Muqdisho, Gaalkacyo iyo Laas Caanood, iyo sidoo kale kooxaha Aambalaasta SRCS ee xaaladaha deg-degga ah ka jawaaba ee Kismaaayo, Beledweyne iyo Dhuusamareeb, iyo kooxaha mutadawiciinta SRCS ee xaaladaha deg-degga ah ka jawaaba ee 18-ka gobol ee dalka iyada oo u mareysa bixinta daawooyinka, agabka joogtada loo adeegsado, mushaaraadka, qalabka, iyo dayactirka kaabeyaasha. Sanadka 2025, taageeradan ayaa sahashay taageerada caafimaad iyo daadgureynta 11'214 bukaan.
- ICRC iyo Ururka Bisha Cas waxay sidoo kale tababbarka gargaarka degdegga ah siiyaan howl-wadeennada ku sugan jiida hore iyo bulshooyinka si loo hagaajiyo dejinta xaaladda dhaawaca iyo bukaanka ilaa loo wareejiyo xarun caafimaad. Sanadka 2025-ta, 64 kulamo ah ayaa loo qabtay 1'477 ka qeybgaleyaal ah, oo ay ku jiraan 445 dagaalyahan, isugeyn 10'338 ayaa waxaa tabobaray SRCS.

### Dhaqan-Celinta Jirka

- ICRC waxay si buuxda u taageertaa 3-da Xarumood ee Dhaqan-celinta Jirka ee Ururka Bisha Cas oo ku kala yaala Muqdisho, Hargeysa iyo Gaalkacayo kuwaas oo taageero u fidiya dadka ay saameeyeen colaadaha oo u baahan qalabka lafaha iyo murqaha, iyo daryeelka fiiso-tarbiyada.
- Sanadka 2025, taageeradan waxay 3'733 bukaan u suurtogelisay in lagu rakibo gacmo iyo lugo macmal ah, iyada oo isugeyn 9'754 la-talin ah laga sameeyay 3-daas xarumood.

### Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah iyo Nafaqo-Darrada

- Goobaha ay saameynta ugu badan ku yeelatay colaaddu, ICRC waxay 26 xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah oo ay SRCS maamusho (ooay ku jiraan 2 xarumaha caafimaadka guur guura ah) ku taageertaa dawooyin, agabka joogtada loo adeegsado, qalabka farsamada, mushaaraadka, u

gudbinta isbitaallada iyo awood dhis. Sanadka 2025, xarumahan ayaa daweeyay 353’851 bukaan iyaga oo gudbiyay 2’493 qof. Sanadka 2025, waxay sidoo kale dhistay 1 xarun caafimaad oo ay SRCS maamusho iyada oo 3 kalena dayactirtay.

- 11 ka mid ah 26-daas xarumood ayaa sidoo kale bixiya taageerada quudinta dheeriga ah iyo daweyn, taas oo sanadkii 2025-ta ay ka faa'ideysteen 56’786 carruur ah iyo 14'378 haween uur leh iyo kuwo nuujinaya oo ku sugnaa xaalad nafaqo-xumo dhexdhexaad ah ama mid ba'an. ICRC-du waxay kaloo taageertaa Xarunta Xasilinta Nafaqa-xumada Ururka Bisha Cas ee Kismaayo halkaas oo 1’999 carruur ah oo ay da'doodu ka hooseyso 5 sano oo ay haysay nafaqo-xumo ba’an lagu daweeyey sanadka 2025.

## Kaalmada gargaarka deg-degga ah

- Haddii ay xaalad degdeg ah ka dhacdo meelaha ay colaaduhu sida aadka ah u saameeyeen, ICRC oo uu weheliyo Ururka Bisha Cas iyo iyada oo la kaashanaysa maamulka maxalliga ah, waxay cunto iyo agabka guriga ee lagama maarmaanka ah(lacag ahaan ama alaab ahaan) ugu qaybisaa barakacayaasha iyo/ama bulshada ugu nugul, ka dib marka la qiimeeyo baahidooda.
- Sanadka 2025, ICRC waxay gargaar lacageed oo ujeeddo badan ah oo hal bil ah u qaybisay 229’428 qof (ama 38’238 qoys), qaar ka mid ah ilaa 3 jeer. 132’462 qof (ama 22’077 qoys) ayaa sidoo kale agabka hoyga ka helay ICRC iyadoo u sii marisiisay Ururka Bisha Cas.

## Taageerada wax soo saarka beeraha iyo xoolaha, adkeysiga, iyo isku filnaanshaha

- Si looga jawaabo cunto yarida daba dheeraatay ee Soomaaliya, loogana caawiyo dadweynaha in ay la qabsadaan isbeddelka cimillada, ICRC waxay taageertaa beer tacbashada, beeraleyda-xoolo dhaqatada ah ama qoysaska xoolo dhaqatada ah oo ay saameeyeen colaadaha ama musiibooyinka dabiiciga ah si loo ilaaliyo, loo soo celiyo ama loo hagaajiyo wax-soo saarkooda cuntada. Tani waxay noqoneysaa qaab deeqaha soo kabashada hab-nololeedka ah (4’496 qoys sanadka 2025), deeqda jawaannada ciida lagu shubo si loo yareeyo saameynta fatahaadaha (29’857 qoys oo ka mid ah 48 bulshooyinka daadadka u nugul ah) iyo shaqo lacag ku bedelasho ee xafidaada hantida wax soo saarka (150 qoys sanadka 2025).
- ICRC waxy sidoo kale taageertaa qoysaska saboolka ah oo ay dumarku hogaamiyaan, dadka dagaalka ku dhaawacma, dhibaneyaasha xadgudubyada jinsiga iyo kooxaha kale ee nugul oo ay hab-nololeedkooda colaaduhu saameeyeen si dakhligooda loo hagaajiyo. Tani waxay noqon kartaa deeqaha hab-nololeedka shakhsiga ah oo loogu talogalay hal-abuurka dhaqaalaha yar yar ee magaalooyinka (1’093 qoys sanadka 2025), bixinta agabka shinni dhaqashada ama kalluumeysiga iyo tababarrada farsamo ee la xiriira (200 qoys sanadka 2025) iyo tababarrada xirfadaha da’yarta (60 qof sanadka 2025).
- ICRC waxay sidoo kale taageertaa Shaqaalaha Caafimaadka Xoolaha ee Bulshada (159 sanadka 2025) si bulshooyinka xoolao dhaqatada ah oo ay colaadaha ama musiibooyinka dabiiciga ahi saameeyeen loo siiyo adeegyada aasaasiga ah ee xoolaha (335 sanadka 2025). Sanadka 2025, arintan ayaa waxaa ka faaîideystay 9’501 qoys waxaana suurta gashay in la daweeyo xoolo gaaraya 70’298. ICRC waxay kaloo iskaashatooyinka beeralayda ku caawisaa in ay horumariyaan wax soo saarkooda cuntada, abuurka ama calafka xoolaha (250 xubnood sanadka 2025).
- Wadar ahaan 45’557 qoys, ama 273’342 qof, ayaa lagu caaiyay barnaamijyada adkeysiga iyo isku-filnaanshaha ee ICRC sanadka 2025.

## Helitaanka biyaha iyo Nadaafadda

- Iyadoo lala kaashanayo mas’uuliyiinta maxalliga ah iyo kuwa bixiya adeegga biyaha ayaa ICRC-du waxay taageertaa, dayactir ku samaysaa iyo/ama meelaha ay colaaddu sida aadka ah u saameysay ka dhistaa nidaamyada biyaha. Hawlahaan waxaa ka mid ah ceel-gacmeedyo, ceelasha riigga ah (oo lagu qalabeeyey bambooyinka gacanta ama bambooyinka korontada ku shaqeeya), waraha biyaha roobka, ilo-biyoodyada, kaabayaasha biyaha oo lagu rakibo tamarta cadceeda ku shaqaysa, ilaalinta goobaha biyaha iyo howlo kale ee looga dan leeyahay in lagu yareeyo saamaynta khataraha cimillada/isbeddelka. Sanadka 2025, 74 nidaamyada biyaha ah ayaa la dhisay/dib loo dayactiray dalka oo dhan iyadoo ay ka faa'iidaysanayaan dad gaaraya 632’781 qof.
- 98 howl-wadeenno ceelasha riigga ah iyo shaqaalaha wakaaladaha biyaha ayaa sidoo kale la tababaray lana qalabeeyay.
- Iyada oo ay wehliso SRCS, ICRC waxay sidoo kale ka jawaabtaa shuban-biyoodka ba'an ee dillaaca also iyada oo bixisa agabka nadaafadda iyo jirgaano (97’529 qof sanadka 2025) iyo kulamo kor u qaadida nadaafadda ah (20 sanadka 2025), waxayna ka hortagtay saameynta fatahaadaha iyada oo dhistay wabiga jiinkiisa (36’000 qof), marka lagu daro hawlaha biyo^-saaridda (34’800 qof oo ku sugan 5 goobood).

### Booqashooyinka dadka xorriyaddooda laga qaaday

- Tan iyo sannadkii 1977-dii ICRC-du waxay booqanaysay dadka xorriyadooda laga qaaday ee ku jira xabsiyada Soomaaliya. Ujeedada booqashooyinkan waa in la hubiyo in shuruudaha xabsiyada iyo sida loola dhaqmo maxaabiista ay waafaqsanyihiin sharciga Soomaaliya iyo heerarka caalamiga ah. iyadoo ka duulaysa indha-indhaynteeda, ICRC-du waxay talooyin la wadaagtaa mas'uuliyiinta xabsiga si loo helo xal lagu hagaajinayo xaaladaha guud ee xabsiyada iyo sida loola macaamilo maxaabiista. Maxaabiista loo arko in ay si gaar ah u nugul yihiin si gaar ah ayaa loo la socdaa. Booqashooyin soo noqnoqda, waraysiyo marag gaar ah oo lala yeesho maxaabiista, iyo wada hadal wax dhisaya, laba geesood ah, oo qarsoodi ah oo lala yeesho mas'uuliyiinta xabsiga ayaa qayb ka ah hababka shaqada ICRC ee xabsiyada.
- Iyadoo ay ku xiran tahay dhibaatooyinka la aqoonsaday, ICRC waxay sidoo kale talo farsamo iyo taageero agab siisaa mas'uuliyiinta, gaar ahaan dhinacyada caafimaadka, nafaqeynta, iyo dayactirka kaabayaasha iyadoo la eegayo horumarinta xaaladaha nololeed iyo nadaafadda maxaabiista iyo shaqaalaha xabsiga. ICRC-du waxay sidoo kale maxaabiista siisaa fursad ay kula xiriiraan qoysaskooda (eeg hoos).
- Sanadka 2025, ICRC waxay 56 booqasho ku tagtay 20 xabsi dalka oo dhan iyada oo booqatay 5'102 maxaabiis ah, oo ay ku jiraan 566 oo si gaar ah loo la socday.
- Wadar ahaan 4'794 maxaabiis ah ayaa helay taageero dhanka nadaafadda ah iyo alaabo shakhsiyadeed oo aasaasi ah (oo ay ku jirto kaalmo dheeraad ah intii lagu jiray bisha barakeysan ee Ramadaan). Dhismayaal caafimaad oo ku yaala 5 xabsi ayey sidoo kale ICRC ku taageertay dawooyin, agab iyo waxyaabo shaqaalaha caafimaadka lagu dhiirigaliyo, arintan oo suurogalisay 15'791 baaritaano caafimaad ah, iyo in nafaqo-darro laga daweeyo 1'834 maxaabiis ah. ICRC-du waxay kaloo hawlo dayactir ah ka fulisay 8 xabsi. ICRC ayaa sidoo kale 237 maxaabiis ah ku caawisay in qoysaskooda la xiriiraan iyo in ay helaan 43 adeegyo qusuliyadeed ah.

### Dib-u-Soo Celinta Xiriirka Qoyska

- ICRC-da iyo Ururka Bisha Cas waxay qoysaska ku caawiyaan sidii ay u heli lahaayeen oo ay dib- ula xiriiri lahaayeen kuwa ay jecel yihiin kuwaas oo ay xiriirkooda ku waayeen colaad, qalalaase, qaxooti, xiriritaan /xabsi iyo/ama musiibooyin. Wicitaanno taleefoon oo lacag la'aan ah iyo Fariimaha Bisha Cas/Laanqayrta Cas (farriintaas oo ah warqad furan oo ay ku jiraan wararka qoyska oo kaliya) oo u oggolaanaya xubnaha qoyska ee kala lumay (oo ay ku jiraan maxaabiista iyo muhaajiriinta) in ay dib isugu xiraan oo ay joogteeyaan xiriirka qoyska. ICRC-da iyo Ururka Bisha Cas waxay kaloo gacan ka geysan karaan dib-u-midaynta carruurta ka luma waalidkood.
- Sanadka 2025, ICRC iyo Ururka Bisha Cas waxay fududeeyeen 138'216 wicitaanno taleefoon, waxay kaloo abaabuleen is-dhaafsiga 47'408 oo Farriimaha Laanqayrta Cas ah waxay fureen 1'170 codsiyo oo baafin iyo eedeymo xarig ah. Waxaa la xaliyay dhammaan 542 kiis ee furnaa oo dadka la la'yahay ahaa, dadka ayaa iskood u xaliyeen ama iyaga oo taageero ka helaya ICRC/SRCS.
- ICRC-du waxay kaloo mas'uuliyiinta maamulka ku taageertaa maaraynta meydadka, si loo hubiyo in si sharaf leh loo aaso iyo in qoysaska lala socodsiiyo (sanadka 2025 waxaa la tababaray 222 xirfadleyaal ah).

### Ilaalinta dadka rayidka ah oo ay colaaduhu saameeyeen

- Iyadoo adeegsanaysa kooxaheeda ilaalinta oo ka hawlgala meelaha ay colaaduhu sida aadka ah u saameeyeen oo dalka oo dhan ah, iyada oo ay sabab u tahay u dhawaanshaheeda dadka rayidka ah iyo bulshooyinka ay saameeyeen qalalaasaha, ICRC waxay ku dadaalaysaa in ay ka hortagto/ yarayso weerarrada ka dhanka ah nolosha iyo sharafta dadka rayidka ah, weerarrada shaqaalaha caafimaadka iyo xarumaha, iyo in la hubiyo ixtiraamka sharciga colaadda hubaysan (sidoo kale loo yaqaan sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada) iyadoo loo maraayo wadahadallo joogto ah, laba geesood ah oo qarsoodi ah oo lala yeelanayo dhammaan dhinacyada colaadda ku lugta leh.
- Sanadka 2025, 143 xaaladood, ICRC ayaa diiwaangalisay dad la wadaagay walaacooda ay ka qabaan cawaaqibka colaadda hubaysan ay ku yeelaneyso noloshooda ama hab-nololeedkooda iyo ixtiraamka loo hayo IHL. Walaacyadaas ayaa si rasmi ah loogala xiriiray dhinacyada colaadda ku lugta leh si loo xaliyo loogana hortago si aysan mustaqbalka mar kale u dhicin iyadoo loo maray 71 matalaad oo rasmi ah. 92 qof ayaa sidoo kale la gudbiyay 102 kalena waxay heleen kaalmo shakhsiga u gaar ah si looga caawiyo in ay bogsadaan.
- ICRC ayaa sidoo kale bixisa adeegeeda dhexdhexaadnimo marka laga hadlayo sii deynta maxaabiista ama hawlaha kale ee la midka ah haddii doorka noocaas oo kale ah loo baahdo.

## Kor-u-qaadista sharciga colaadda hubaysan iyo mabaadi'da bani'aadamnimada

- ICRC-du waxay gacan ka geysataa xoojinta awoodda ciidamada amniga ee Soomaaliya si ay u faafiyaan uguna mideeyaan sharciga colaadda hubeysan, si loo horumariyo dhawridda dadka rayidka ah. Sanadka 2025, 34 tababar ah ayey ICRC u qabatay 2'656 xubnood oo ka tirsan ciidamada amniga iyo difaaca.
- ICRC-du waxay kaloo abaabushaa kulamo kor-u-qaadis wacyi gelin ah oo ku saabsan mabaadi'da aasaasiga ah ee sharciga colaadda hubaysan iyo mabaadi'da bani'aadamnimada oo loo qabtay bulshada iyo culimada, hay'adaha amniga, ardayda, xirfadlayaasha caafimaadka, iyo qaybaha kala duwan ee bulshada rayidka ah. Sanadka 2025, 141 kulan ayaa la gaarsiiyay 3'616 qof.
- ICRC-du waxay kaloo taageertaa hay'adaha dawladda iyo kuwa sharci-dejinta, ansixinta iyo hirgelinta qaranka ee heshiisyada caalamiga ah ee sharciga colaadda hubaysan. Waxa kale oo ay taageertaa kor-u- qaadista iyo in sharciga colaadda hubeysan laga dhigo jaamacadaha iyo mac-hadyada tacliinta sare.

## Iskaashiga Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed

- Soomaaliya, ICRC waxay si dhow ula shaqeysaa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS), oo ka howlgala dalka oo dhan iyada oo la adeegsanayo shabakad ka kooban 18 laamood iyo 130 laan hoosaadyo ah, 1'155 shaqaale ah, in ka badan 5'100 mutadawiciin shaqeeya ah iyo ku dhawaad 20'000 mutadawiciin bulsho ah.
- Waxay sidoo kale si dhow ula shaqeysaa xubnaha kale ee Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas ee Soomaaliya ku sugan ee taageera SRCS (tusaale ahaan: Jamciyad Qarameedyada dalalka kale iyo Isku-dhafka Caalamiga ah ee Ururrada Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas) si loo xoojiyo horumarka ururka iyo awoodaha shaqo ee SRCS, iyada oo lagu saleynayo qorshaheeda istiraatijiyadeed, iyada oo sidoo kale siisa taageero farsamo, mid dhanka saadka ah iyo mid maaliyadeed.
- Gaar ahaan, sida kor ku xusan ba, ICRC waxay taageertaa isbitaalka Keysaney ee Muqdisho oo ay SRCS maamusho, 26 xarun caafimaad oo SRCS ah, 3-da xarumood ee dhaqan celinta jirka ee SRCS iyo kooxaheeda ka jawaaba xaaladaha deg-degga ah ee Aambalaasta.
- Iskaashiga ICRC-SRCS waxaa sidoo kale ka mid ah dhinacyada u diyaargarowga iyo ka jawaabidda xaaladaha deg-degga ah, tababarka iyo maareynta mutadawiciinta SRCS, maareynta amniga, kaabeyaasha (3 xafiis oo SRCS ah iyo 2 bakhaar oo ay ICRC dhistay/dayactirtay sanadka 2024), dakhli abuur, gargaarka deg-degga ah, soo celinta xiriirka qoyska, kor-u-qaadista mabaadi'da bini'aadamnimo iyo diblomaasiyadda bini'aadamnimada.

*Iyadoo loo marayo Qaybteeda Maaraynta Khatarta, ICRC-da Soomaaliya waxay sidoo kale hubisaa in ay u xisaab celiso dadka ay dhibaatadu saameysey oo ay u adeegto, waxayna xaqiijisaa wada xiriir laba-geesood ah waxayna maaraysaa khatarta ka dhalan karta khiyaanada iyo leexsashada gargaarka iyo kuwo kale.Sanadka 2025, ICRC waxay heshay oo wax ka qabatay 27'954 wicitaan oo ka yimid dadka ay dhibaatadu saameysey iyadoo loo maray khadkeeda lacag la'aanta ah, waxayna si firfircoon ula xiriirtay 61'491 ka faa'iideystayaa ahl si loo xaqiijiyo iyadoo loo maray xarunteeda wicitaanka. Intaa waxaa dheer, 42 howlo kormeer oo dhinac saddexaad ah ayaa waxaa fuliyay la-taliyeyaal madaxbannaan.*

++++++++++